*This information is available in alternative format upon request.*

# ***Mamulka Qeybta Guryaha ee Boston*: Improving Accessibility for All**

## Su'aallaha ay badanaa waydiinyaan dadka degaanka guryaha oo ah dadka waaweyn iyo kuwa curyaamiinta ah

**Waa maxey guryaha leh meel eey dadka waayeen/curyaanku ka galaan eey leedahey Mamulka Qeybta Guryaha ee Boston?**
Mamulka Qeybta Guryaha ee Boston waxey dhawaan heshiis la saxiideen Qeybta Guryeynta Horumarinta Madaniga oo markii la soo gaabiyo la dhaho (HUD). Heshiiskaas oo dhigaya in 5% guryaha Qeybta Guryaha ee Boston iyo guud ahaan degaaankay maamulaan laga dhigo kuwa leh meel dadka waaweeyn/curyaamadu ka galaan. Heshiisku wuxuu dhigayaa in qorshaha la fuliyo muddo 5 Sanno gudahood.

Qorshahu waa mid eey diyaarisey Mamulka Qeybta Guryaha ee Boston si eey ugu sahasho dadka waaweeyn iyo kuwa curyaamada ah . Qorshaas eey mamulka guryaha wuxuu keenayaa in 267 guri oo ah kuwa qoysaska ah, iyo 100 guri oo ah kuwa horumarinta curyaamada iyo dadka waaweeyn looga shaqeeyo si eey u noqdaan kuwa u qalabeysan (curyaan galid). Waxaa kaloo dib u habeyn lagu sameynayaa meelaha kale ee magaaladda oo horumarinta leedahay si eey u noqdaan kuwa u sahalan (curyaan galid).

**Yaa ku noolaan doona guryaha curyaan galida leh ee cusub?**
Waxaa jirta baahi joogta ah oo aan wali laga haqabtirin oo haysata dadka hadda degan Mamulka Qeybta Guryaha ee Boston iyo kuwa soo buuxiya dalab cusub ee raba gurya ku qalabeysan (Curyaan galid). Kuwa u badan guryaha curyaan galista leh baa hadda degan kuwa aan laheyn. Kuwa sugayana waxey ku qaadataa muddo dheer iney helaan. Isla markaas, Mamulka Qeybta Guryaha ee Boston waxey shaqaalaysiisey la taliye madax banaan oo baaritaan buuxa ku sameeya sida loo degan yahey. Baaritaankaan waxaa laga ogaadey in 4.8% qoyska Boston ee xaqa u leh in la siiyo guryaha dowladda ay u baahan yihiin guryo leh (Curyaan galid) si loogu wacyi galiyo dadka guryaha cusub. Mamulka Qeybta Guryaha ee Boston waxey samaysay barnaamij lagu ogaysiinayo qorshahaan Hay'adaha dadka Gobolka u Dooda.

**Sidee baa Mamulka Qeybta Guryaha ee Boston u go'aaminaysaa halka dib u habeynta lagu samaynayo guryaha?**
Qeybta Guryaha ee Boston waxay samaysay qorshe dhisme oo bilow ah, waxayna isticmaashay habkan hoose ee soo socoda, si ay u go'aamiyaan meesha Guryaha Horumarinta ugu haboon in loga sameeyo dib u habeynta. Kuwa buuxiya shuruudaha dowladda dhexe ka rabto iney buuxiyaan guryahaani. Qaar ka mid ah guryahaan waxaa lagu furayaa/darayaa haddii uu ku dhegan yahey qol – is wata

(studio) si loo daboolo baahida weeyn ee loo qabo guryo labo qol ahoo loogu tala galay dadka u baahan qof daryeela oo la dega.

**Sidee beey Mamulka Qeybta Guryaha ee Boston ku go'aansatey meesha laga looga sameynhayo dib u habeynta guryaha?**

- Qaabka dismaha guryaha dowladda iyo dhulka ay ku fadhiyaan.
- Fududeynta galista guryaha daar kasta.
- Intee guri amaba darood oo leh (Curyaan galid)
- Siday u fuduudahay in la cusboonaysiiyo guryahaan
- Sidee ugu fudud amaba ugu furanta guryaha ee goobaha Cafimaadka iyo Gaadidika guud.
- Baahida guryo leh (Curyaan galid), tiradda iyo aaga.

**Sidee beey ii sameeyneysaa aniga?**

- Waxaa dhici karta inuu dhisme ka socod xaafadeydda.
- Dhaqaalihii Mashruuca ee horey loogu talla galey in dib uga dhici kara meello badan.
- Dadka sugayaha badalka guryaha iyo kuwa guryaha dalbadeyba waxey u baahanyihiin iney in badan sugaan.
- 5% oo ka mid ah dadka degan guud ahaan magaaladda waa ineyn u guraan si aan rasmi aheyn amaba si rasmi ah.

**Ma inaan guraa?**

Dhici meyso. Hase ahaatee, qeyb yar oo ka mid ah dadka degaanka degan (5% oo ka mid ah dadka degan guud ahaan magaaladda) waxey u haahanyihiin iney guraan. Ama ha u guraan si ku meel gaar ah amaba si rasmi ah ha u guraan, sida daradeed guryaha ey degan yihiin ayaa dib u habeyn lagu sameyn karaa. Qeybta Guraya ee Boston waxey dhiseysaa qorshe dib u dajin oo eey horumar iyo wadda tashiba kala sameyneyso hayadda maamusha dadka degaanka degan. Qorshaas waxuu u ogolaanhayaa qof kasta oo degan xafadda haddii la yiraahdo guur, wuxuu dooran karaa inuu dib loo dejiyo guri ku filanaa laga heli karo meesha eey hadda deganyihiin amaba ey helaan wax la dhaho (warqadda qyebta 8 daad –section 8), amaba iney u guraan meel kale oo ka mid ah guryaha Qeybta Guryaha ee Boston.

**Ma jiraa qof iga caawinahaya guuritaanka?**

Haah. Qeybta Guryaha ee Boston baa waxey kuugu caawinhayaan lacag la'aan sidii aad ugu guri laheyd. Cawinaadaas waxaa la socoda iyagoo lagu raro alaabadaadii oo dhan, isla markaanah la hubinhayo iney ogyihiin qoladda bostadda iyo kuwa waxaa dadka u keenaba si lagu sheego in aad guurtey loonah sameeyo si loo badallo cinwaankaaga. Mamulka Qeybta Guryaha ee Boston waxey shaqaaleysiinayaan qof ku takhasusey geediga guraya kaas oo la kulmaya qofka degan guriga hubin hayanah in wax walba sidii loogu baahnaa ey ku dhammaadaan oo looga shaqeeyo.

**Qofka guriga degan ma awoodaa inuu ka qeyb qaato habka qaab dhismeedka socoda iyo sida shaqaddu u socotaba?**

Dad ka mid ah Ururka degan xaafadda ayaa lagu darayaa iney ka mid noqdaan gudiga loo doortey iney eegaan qaab dhismeedka iyo

go'aan qaadasha ku saabsan qaabka iyo sida shaqadda dhismaha u socoto intaba.

**Gorma ayuu bilaaban dhismahu?**
Xaafad walba oo loo doorto iney fursad u hesho dib u habeynta (Curyaan galid) ee Mamulka Qeybta Guryaha ee Boston in dib u habeyn lagu sameeyo, waxey yeelan doontaa naqshadeeda iyo jadwalkeeda u gaarka ah ee dhismeed. Shaqadda dhismaha waxey si dhab ah uga bilaaban xaafad walba 12-15 bilood ka dib markii u injinyeerku bixiyo ogeysiis ah in shaqadda la bilaabi doono. Qeybta Guryaha ee Boston waxey iyagnah sameyn doonaan ogeysiis kale oo ah wakhtiga u dhismahu bilaaban doono si ey dadka xaafadda degan horey ugu ogaadaan gorta shaqaddu bilaadan doonto.

**Muxuu yahey qorshaha dhimi kara daahid ku timaada dadka ku harey degan Mamulka Qeybta Guraya ee Boston inta dhismuhu socodo?**
Qorshe kasta oo ah Mashruuc dhismeed, mar walba waxaa jirta cudlad amaba dib u dhac la xariirta shaqadda. Si loo yareeyo xajmiga cudladaas, shaqadda markii la gudda gallo oo guryaha oo dhan la cusbooneysiinhayo oo aan wali dhismihii u ku socodo. Intaas waxaa raacsan, in caqdiga dhismaha oo la socoda qodob aad u adag si ey u saacido iney noqoto meel aamin, nadiif ah. Dadka degaanka degan waxey la shaqeynhayaan amaba lug ku lahaan doonaan sidii loogu diyaarin lahaa qodobadaas oo eey ugala shaqeyn lahayeen qoladda eey u xilsaartey xaafadda iney wax ka qabtaan naqshadda dhismaha. Mamulka Qeybta Guryaha ee Boston waxey laahaan doonaan dad jooga qeybta dhismaha si ey ula socodaan amab u kor meeraan habka shaqaddu ku socoto.

**Maxaa dhacaya haddii u dib u dhac ku dhaco Dhaqaalaha Mashruuca ? Sidee baanse ku ogaan karnaa sidey arinu tahey?**
Haddii lagu siiyo kharashka mashruucaan (oo dhan $52 Malyan), Mamulka Qeybta Guryaha ee Boston ma lahaan karto fursad lakiin waxey dib u dhigi karaan mashruucii hore, ilaa eey ka helaan dhaqaalle siyaado ah. Ninka qeybtaas ka ah mamullaha iyo Mamulka Qeybta Guryah ee Boston shaqaalaheeda ayaa la kulmaya dadka wakiilka ka ah dadka degan sXafadda waxeynah kala hadlayaan wax ku saabsan shaqadda xafadooda laga hayo iyo dhaqaalaha mashruuca oo dib u dhac ku dhacey. Mamulka Qeybta Guryaha ee Boston waxey mar walba u sheegahayaan dadka degaanka degan wakhtiga dhismaha iyo sida hadaba dhaqaallaha mashruuca uu u sameeyo isbadel si uu mashruuc horey ugu socodo.

**Sidee ba Mashruucaan wax ugu dhimi karaa dadka degaanka oo sugahayaa iney guuraan amaba ah kuwa dalbadey iney soo degaan xaafadda ee cusub?**
Mashruucaan wuxuu u sahlahayaa Mamulka Qeybta Guryaha ee Boston amaba eey siineysaa in la dejiyo dada ku jira liiska sugitaanka guryaha si ka dhakhsa badan sidii hore. Si loogu hello guryo dadka degaanka ee uu mashruuc gaarey, Mamulka Qeybta Guryaha ee Boston waxey u baahantahey in eey joojiso iney qeybaha amaba xaafadaha qaarkood eey ka bixiyaan guryo. Taasinah waxey sameeyneysaa dadka sugahaya badalka guryaha.